# Office of Lawyers Professional Responsibility

## Complaints and Investigations

**Office of Lawyers Professional Responsibility**
445 Minnesota Street, Suite 2400
St. Paul, MN 55101-2139
(651) 296-3952 (Outstate) 1-800-657-3601
http://lprb.mncourts.gov

Isticmaalayaasha TTY waxay wacaan Adeega MN Dadka Dhagaha Culus
Lambarka lacag la'aanta ah ee 1-800-627-3529

Maxaad samayn lahayd haddii aad rumaysan tahay in qareenku u dhaqmay si aan qaab xirfad ahayn? Buug-yarahani wuxuu ku siinayaa hagitaan ku saabsan ka jawaabida su'aalaha sida:

- Sideen u maareeyaa muranka ka jira khidmadda?
- Sidee dhibaatooyinka looga hortagi karaa?
- Waa maxay nidaamka mas'uuliyadda xirfadeed ee qareennada?
- Sideen ugu xareyaa dacwad mas'uuliyad xirfadeed oo ka dhan qareen?
- Maxaa dhacaya haddii aan xereeyo cabasho?
- Ma jiraan siyaabo kale oo lagu xalliyo dhibaatooyinka qareenada?

---

## KAHORTAGIDA DHIBAATOOYINKA AAD KALA KULANTO QAREENKAAGA

Dhibaatooyin badan ayaa laga hortagi karaa haddii aad taqaanno waxa laga filan karo qareennada iyo sida loola macaamilo qareennada. Talooyinka loogu talagalay ka fogaanshaha dhibaatooyinka waxaa ka mid ah:

- **Yeelo Rajo macquul ah**

Dadka qaar kuma qanacsana qareenada maxaa yeelay waxay leeyihiin rajooyin aan macquul ahayn. Weydii qareenkaaga waxa aad filan karto: Intee in leeg ayey qaadan doontaa arrinta? Qiyaas intee le'eg oo lacag ah ayay ku kacaysaa?

- **Heshiisyada khidmadaha**

Muran badan ayaa ka yimaada qareennada iyo macaamiisha leh faham kala duwan oo ku saabsan khidmadaha. Hel heshiis khidmad oo qoraal ah weydiisana biil degdeg ah.

- **Iskaashi**

Udiro dukumiintiyada iyo macluumaadka qareenkaaga isla markiiba. Taas bedelkeeda, ka filo qareenkaaga inuu kula socodsiiyo oo uu ku siiyo nuqulada dukumiinti muhiim ah.

- **Cusboonaysii**

Haddii cinwaankaaga ama lambarka taleefankaagu is beddelo, la socodsii qareenkaaga. Haddii aad bedesho go'aankaaga ku saabsan arrinta sharciga, la socodsii qareenkaaga.

- **Wada xiriir**

Ka filo garyaqaanka inuu kula socodsiiyo dhammaan horumarada muhiimka ah. Haddii aadan ku qanacsaneyn, la socodsii qareenka sababta.

Qor si aad u xaqiijiso dhammaan fahamada muhiimka ah. La soco wicitaanada taleefankaaga qareenka.

---

## DHIBAATOOYINKA MAS'UULIYADDA XIRFADEED

Qareenada waxaa laga filayaa inay buuxiyaan heerar sare. Heerarka anshax ee qareennada waxaa dejisay Maxkamadda Sare ee Minnesota ee Xeerarka Anshaxa Xirfadeed. Xeerarkan waxaa laga heli karaa barteena internetka: www.mncourts.gov/lprb. Haddii qareen ku xadgudbo xeerarkan, qareenka ayaa lagu soo rogi karaa xadgudubka.

Dhibaatooyinka qaarkood ee qareennada waxaa lagu maareeyaa Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada. Kuwa kale maahan. Waa kuwan tusaalayaal kooban oo ku saabsan cabashooyinka uu wax ka qabto Xafiiskani:

- **Dayacaad iyo Dib udhac**

Qareenada waxaa looga baahan yahay inay si macquul ah ku dedejiyaan oo waliba si macquula macaamiisha ula socodsiiyaan wax kasta. Miyaad u malaynaysaa in qareenkaagu muddo dheer ku qaatay arrintaada sharciga? La xiriir qareenka oo ku weydii sharaxaad qaab qoraal ah. Haddii aadan helin jawaab lagu qanco, soo gudbi cabasho.

- **Soo Celinta Faylkaaga**

Macmiilku wuu beddeli karaa qareennada sabab kasta ha noqotee. Beddelaadda qareennada waxay kordhin kartaa kharashka ama daahitaanka ayay keeni kartaa, laakiin waa ikhtiyaarkaada inaad taas sameyso. Haddii aad faylkaaga ka rabto qareenkaaga, wac oo weydii. Haddii aadan helin, u soo dir warqad shaabadaysan adigoo ku celinaya dalabka. Haddii aadan wali helin faylkaaga, ama qareenku ku adkeysanayo inaad bixiso qarashyada koobiyeynta kahor intaadan helin, soo gudbi cabasho.

- **Lacagta iyo Xisaabinta**

Mararka qaar qareennadu waxay lacag hayaan macaamiisha. Mararka qaar qareennadu waxay u qabtaan xisaab dejinta ama abaalmarinta macaamiishooda. Marka qareenka uu maareeyo lacagta macmiilka, qareenku waa inuu si dhaqso leh oo gebi ahaanba iskaga saxaa xisaabta lacagta. Haddii uu jiro dib u dhac weyn oo ku yimaada lacag ka helista qareen ama helitaanka xisaab celin dhameystiran, soo gudbi cabasho.

- **Khilaafka Xiisaha**

  Mararka qaarkood qareennadu waxay uga doodaan in ka badan hal macmiil arrin. Xaaladaha kale qareenku wuxuu meteli karaa macmiil isla markaana waqti dambe waxuu ka hor imaan karaa macmiilkii hore. Mararka qaarkood macmiilku wuxuu aqbali karaa shaqada qareenka inkastoo khilaaf jiro. Haddii aad aamminsan tahay in qareenkaagu si aan habboonayn u metelayo danaha is khilaafsan, soo gudbi cabasho.

- **Daacad darro**

  Qareenada waa laga mamnuucay inay si ula kac ah u sheegaan hadalo been abuur ah, si kastaba ha noqotee, qareennada ayaa u matali kara danaha macaamiishooda si ba'an. Tani waxay ku lug yeelan kartaa ku tiirsanaanta nooca macmiilka ee xaqiiqooyinka. Dacwadaha, inta badan khilaafaadka ku saabsan xaqiiqooyinka waxaa xaliya maxkamadaha.

---

## DHIBAATOOYINKA KALE

- **Khidmadaha**

  Inta badan khilaafaadka khidmadaha caadiga ah waxaa si fiican loogu xaliyaa meel ka baxsan Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada. Qareenka iyo macmiilka ayaa laga yaabaa inay gaaraan isfaham. Dhexdhexaadinta khidmadda waa hab dhakhso badan oo fudud oo lagu xalliyo khilaafaadka khidmadda. Waxaad ka wici kartaa Ururka Qareennada Gobolka Minnesota (612) 333-1183, cinwaanka iyo lambarka taleefanka guddiga xallinta khidmadaha deegaankaaga. Marar dhawr ah, haddii qareenku kugu soo oogo lacag cad oo sharci darro ah ama xad dhaaf ah, edbin ayaa laga yaabaa inay keento.

- **Dhaqan Xumo**

  Qareenada, sida xirfadleyda kale, mararka qaar qaladaad ayey sameeyaan. Qareenku wuxuu u maarayn karaa arrin qaab aan ku haboonayn laakiin aan anshax xumo ahayn. Haddii macmiilku lagu waxyeelleeyey dayacaadda ka dhan ah qareenka, dacwad dhaqan xumo ah ayaa la keeni karaa. Anshax xumada inteeda badan iyo arrimaha waxqabadka aan haboonayn **laguma** maareeyo Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada.

- **Dabeecad Shakhsiyeed**

  Inta badan cabashooyinka ku lug leh dabeecadaha qareenka ee ka baxsan ku dhaqanka sharciga, sida adeegsiga luuqad ah cay, muranka milkiilaha-kireystaha iyo arrimaha deymiyaha-la daymiyaha, **laguma**

maareeyo Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada.  Arimaha halista ah, sida khiyaanada iyo dembiyada ciqaabta, waxaa lagu muteysan karaa edbin.

- **Qofka Kasoo Horjeedo Qareenka**

Ma ka caban kartaa qareenka qofka kale?  Haa, laakiin cabashooyinka noocan oo kale ah waxay inta badan ku fashilmaan inay fahmaan nidaamka cadawtinimada leh ee aan haysano.  Qareenadu waa inay si adag u matalaan macaamiishooda.  Nidaamka noocan oo kale ah wuxuu inta badan soo saaraa noocyo kala duwan oo xaqiiqooyinka ku saabsan dacwadaha iyo qaddar go'an oo dareen adag ah.  Kaliya xadgudubyada tooska ah ayaa la edbin doonaa, iyadoo badanaa markay maxkamaddu go'aan ka gaarto arrinta.

- **Cabashooyinka Deyn-bixiyeyaasha**

Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada. ma aha wakaalad ka shaqaysa aruurinta.  Inta badan cabashooyinka qareennada aan bixin biilasha waxaa sida ugu wanaagsan lagu xalliyaa maxkamadaha madaniga ah.  Xaaladaha aadka u daran talaabo edbin ah ayaa laga qaadi karaa - tusaale ahaan, qaab ula kac aan ku qanacsaneyn iyo xukuno laxiriira ku dhaqanka, bixinta jeegag akoon xiran, khayaano, iwm.

- **Cabashooyinka Eedeysanayaasha Dembiyada**

Maxkamadda Sare ee Minnesota ayaa amar ku bixisay in cabashooyinka ay soo gudbiyaan eedeysanayaasha dambiilayaasha ah ama kuwa la xukumay ee ah in qareenadooda aysan keenin matalaad ku filan ay tahay in lagu qaado nidaamka cadaaladda dembiyada.  Haddii maxkamaddu u aragto inuu qareen si khaldan u dhaqmay, edbin ayaa laga yaabaa inay keento. Sidoo kale, cabashooyinka ka dhanka ah qareenka ay maxkamadu magacaawday ee matalaada aan ku filnayn waa in lala soo bandhigo iyadoo maxkamada ay arinta maareyso.

- **Cabashooyinka ka dhanka ah Garsoorayaasha**

Cabashooyinka ka dhanka ah garsoorayaasha waxaa wax ka qabata hay'ad gaar ah oo la yiraahdo Board on Judicial Standards.  Waxaa lagala xiriiri karaa (651) 296-3999.

---

## SIDEE CABASHOOYINKA WAX LOOGA QABTO

- **Soo Gudbinta Cabasho**

Waxaad ku xareysan kartaa cabasho qaab ah onlayn, boosto ama fakis ah.  Booqo barta www.lprb.mncourts.gov. Cabashooyinka sidoo kale

waxaa loo diri karaa Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada, 445 Minnesota Street, Suite 2400, St. Paul, MN 55101-2139, (651) 296-3952.

Cabashada waa inay kujirtaa qoraaga iyo qareenka magacyadooda iyo cinwaankooda, iyo bayaanka anshax xumada lagu eedeeyay. Nuqulada dukumiintiyada muhiimka ah waa in lagu daraa.

- **Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada**

Xafiiska waxaa aasaasay Maxkamadda Sare ee Minnesota si ay u baarto cabashooyinka anshaxa ee ka dhanka ah qareennada. Xafiiska waxaa kormeeraya Lawyers Professional Responsibility Board, oo leh xubno sagaal ah oo aan qareeno ahayn iyo afar iyo toban xubnood oo qareen ah. Guddiyada anshaxa degmada ee tabaruca ah oo ka kooban qareenno iyo kuwo aan qareeno ahayn oo ku baahsan gobolka ayaa gacan ka geysanaya baaritaanka cabashooyinka.

- **Dib u eegista Cabashooyinka**

Qiyaastii laba toddobaad ka dib markay helaan cabasho, Xafiiska ayaa kaga soo jawaabi doonaa qaab qoraal ah. Jawaabta ayaa cadeyn doonta in cabashada la baari doono ama la diidi doono baaritaan la'aan. Tusaalooyinka cabashooyinka ee inta badan la diido baaritaan la'aan waxaa ka mid ah: khilaafaadka khidmadaha joogtada ah; cabashooyinka yaryar ee ku saabsan anshax xumo shaqsiyeed ee qareen ka baxsan ku dhaqanka sharciga; arrimaha badankood ee maxkamadda ku xiran, haddii anshax xumadu caddaato oo ay culus tahay mooyee; inta badan cabashooyinka ka dhanka ah qareenka ay maxkamaddu magacawday; iyo arrimaha kale ee aan sida ugu wanaagsan wax looga qaban anshax ahaan ama arrimo edbin ahaan.

- **Baaritaan**

Cabashooyinka badankood waxaa baaraya guddiyada anshaxa ee degmada. Guddiyadan waxay caadi ahaan la xiriiraan qofka ashtakoonaya iyo qareenka, waxayna dib u eegaan dukumiintiyada muhiimka ah. Guddiyadu waxay markaa ka dib u soo jeedinayaan Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada haddii anshax marin la siinayo iyo in kale.

- **Go'aan**

Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada ayaa go'aamiya in qareenku ku xadgudbay xeerka anshaxa xirfadeed. Hadday sidaas tahay, anshaxa qaarkood ayaa habboon. Waxaa jira anshaxyo kala duwan oo la heli karo. Tan ugu caansan waa "canaan." Canaan ayaa la soo saaraa markii anshax xumada qareenka la go'doomiyay laakiin aan qatar ahayn -

tusaale ahaan, dayaca hal feyl. Go'aan kasta oo edbinta khaaska ah waxaa u dacwoon kara qofka cabanaya xubin ka tirsan Guddiga Qareenada. Qiyaastii 125-150 qareenno ayaa si gaar ah loo edbiyaa sannad kasta.

- **Anshaxa Maxkamada Sare**

Ku xadgudubyada sharciga ee culus waxay sababi karaan anshax Maxkamada Sare ee Minnesota. Dembiyada sida qaadashada lacag, dambiyada, hadalo been ah oo ula kac ah usheegida maxkamad ama macmiil iyo ka tagida dhowr macmiil waxay sababi kartaa waayitaanka ruqsada qareenimada ee ku dhaqanka sharciga. Dhammaan dacwadaha edbinta ee ka hor Maxkamadda Sare waxay u furan yihiin dadweynaha. Maxkamaddu waxay si guud u edbisaa ilaa afartan qareen sanad walba.

- **Macluumaad**

Haddii aad xareysato cabasho, Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada ayaa kugula socodsiin doona halka ay marayso baaritaanka iyo wixii dacwad ah. Haddii aad ka dacwooto qareenkaaga, oo uu jiro baaritaan, waxaad heli doontaa nuqul ah jawaabta qareenkaaga. Go'aanka kama dambaysta ah ayaa had iyo jeer lagugu siin karaa qaab qoraal ah oo sharraxaad leh.

- **Waxa Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada aysan Qaban Karin**

Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada **ma:**

-- matali karo dadka arrin kasta oo sharci ama la talin sharci ah;

-- ka qaadi karo lacag ama hanti qareen si uu ugu celiyo macmiilka ama deyn bixiye ama kaa caawiyo inaad lacag ka hesho qareenkaaga;

-- u dacweeyn karo garyaqaan shaqo taxaddar la'aan ah, ama shaqo uu ku fashilmay inuu qabtay qareenku;

-- beddeli karo lacagta uu qareenku ku soo oogay ama u baahan yahay lacag celin, xitaa haddii ay khidmaddu si cad ay xad dhaaf u tahay.

Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada wuxuu ku egyahay baaritaanka cabashooyinka anshax xumada iyo qaadida talaabooyinka anshax marinta qareenada markay haboon tahay.

- **Sanduuqa Amniga Macaamiilka**

Maxkamadda Sare ee Minnesota ayaa aasaastay Sanduuqa Amniga Macaamiisha si ay u bixiso dacwadaha ka dhanka ah qareennada **si ula kac ah oo aan daacadnimo ku jirin uga lumiyay macaamiisha lacag.** Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada.

- **Ka Jawaab Su'aalaha Badanaa Nalawaydiiyo**

S. Ma jiraan wax lacag ah oo layskaga qaado baaritaanka cabashada?

J. Marna wax lacag ah layskagama qaado dacwad xareyn ama baaritaan.

- Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada waxaa maalgeliya ajuurada diiwaangelinta qareenka.

S. Miyaan dhibaato ku gali karaa cabasho aan ka gudbiyo qareen?

J. Xeerka 21 ee Xeerarka ku Saabsan Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada wuxuu sheegayaa in bayaan ama cabasho ka dhan ah qareen loo gudbiyo Xafiiskaan ama baarayaasheeda, "gabi ahaanba ay tahay mid mudnaan gaar ah leh oo aan saldhig u noqon karin mas'uuliyadda dacwad madani ah oo kasta oo lagu soo oogo qofka sameeyey cabashada, eeda ama qoraalka. "

S. Cabashooyinka ka dhanka ah qareennada ma mid baahsan baa?

J. Sharciga guud ayaa ah in cabashooyinka ka dhanka ah qareennada aysan ahayn kuwa baahsan. Faylasha baaritaanka cidna ma heli karto marka laga reebo qareenka. Qaybaha feylka waa loo soo bandhigi karaa markii loo baahdo baaritaanka. Mid ka reeban sharcigan waa fayl garaynta maxkamada sare, dacwadaha iyo dhageysiga, arrimaha qatarta ah, ee u furan dadweynaha.

- **Gabagabo**

Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfada Qareennada wuxuu adeeg u fidiyaa dadweynaha iyo xirfadleyda sharciga isagoo baaraya cabashooyinka qareenada u dhaqmay si anshax xumo ah isla markaana dacwad ku ooga anshax xumo markii la helo. Nidaamka waxaa loola jeedaa inuu u cadaalad falo dadka cabanaya iyo qareennada si markaa dacwooyinka si dhakhso leh oo macquul ah loo tixgeliyo.

Si aad u weydiiso su'aalo dheeri ah oo ku saabsan soo gudbinta cabashada ama inaad ka hesho agabkan wicitaan warbaahineed oo kale ka wac (651) 296-3952 (Dibedda: 1-800-657-3601). Isticmaalayaasha TTY waxay wacaan Adeega MN Dadka Dhagaha Culus telefoonka lacag’laanta ee 1-800-627-3529 Macluumaad dheeri ah waxaa laga heli karaa barta www.lprb.mncourts.gov.